



## **Mawduuca (Subject): Warka Cusub Ee Daawashada Iyo U Diyaargarowga Roobka**

Qoyska Degmada Dugsiga Midaysan Ee San Diyeego Ee Sharafta Leh,

Waan fahansanahay in qoysas badan iyo asxaabteena ay weli ka soo kabsanayaan roobkii asbuucii hore kaasoo keenay deegaankeena roobabkii ugu badnaa iyo fatahaado aad ah. Iyadoo shaqaalaha degmada ay sii wadaan taageerida kuwa ay saamaysay, waxaan isu diyaarinaynaa roob kale oo la filayo inuu keeni doono San Diyeego dabaylo badan, roob, iyo daadad laga bilaabo subaxa hore ee beri. Dhammaan dugsiyada Degmada Dugsiga Midaysan Ee San Diyeego wey furnaan doonaan beri, Khamiista, Febraayo 1.

Waxay Magaalada San Diyeego dhawaan soo saartay digniin ku saabsan daad guray ee loogu talagalay dadka ku nool meelaha ay daadku ku soo fatahaan. Waan sii wadi doonaa la shaqaynta Magaalada iyo inaan si joogto ah ula socono saamaynta uu roobka ku leeyahay dugsiyadeena iyo xarumaheena, waxaanan diyaarin doonaa shaqaale dheeraad ah oo diyaar u ah inay caawinaan dugsiyada u baahan taageerada. Waxaan sidoo kale **haynaa khayraad la heli karo** oo loogu talagalay ardayda, qoysaska, iyo shaqaalaha, oo uu ku jiro cunto, waxyaabaha ay shakhsiyadka u baahan yihii, macluumaadka guryaha, iyo adeegyada caafimaadka maskaxda.

Hadii aad u baahan tahay taageerka la xiriiro daadadka, fadlan wac Khadka Caafimaadka iyo Wanaagsanaanta ee Degmada Dugsiga Midaysan Ee San Diyeego oo laga heli karo 760-334-7878 inta u dhexeysa 8 subaxnimo (a.m.) iyo 5 fiidnimo (p.m.), Isniin ilaa Jimco. Macluumaad iyo khayraad ayaa sidoo kale la heli karaa 24'ta saacaadood maalintii iyo todoba maalin asbuucii (24/7) hadii la waco 2-1-1 ama la boooqdo **211San Diego online**.

Amniga iyo wanaagsanaanta dhammaan qoyskeena Degmada Dugsiga Midaysan Ee San Diyeego ayaa weli ah mudnaanteena koowaad.

Jacayl iyo mahadnaq dhammaan waxa aad tahay iyo wax kasta oo aad qabato.

Ubuntu,

Dr. Lamont A. Jackson  
Koormeeraha Sare Wax Barashada Dadweynaha